


**FAAFINTA**

الرسمية



**RASMIGA**

جريدة

**DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND EE SOOMAALIYA**

لولاية ارض بونت الصومال

Sanadka 8-aad. Garowe 25. February . 2007

Lam. 2

جريدة الشهرية

**Faafinta bil walba soo baxda**

**Qeypta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawlad Goboleedka Puntland**

Qiimuhu waa Sh.So 10.000 walba rukunka sanadkii waa Sh.So 170.000 dalka gudihiiisa dibada Sh.So 500.000 rukunka la waydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilowday 1-da Janaayo qiimaha qoritaanka F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So 3.000, rukunka iyo qoritaanka waxaa la waydiistaa qeypta maamulka Faafinta rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha berriga ee Wassaaradda maaliyadda.

**TUSMADA**

**Qeypta Koowaad**

**Sharci**

**Qeypta labaad**

**Xeer**

**Waxba Ma leh**

**Qeypta Saddexaad**

Talooyin, Isgaarsiin, Ogaysiis, Iidheh IWM.

*Sharci Lr. 8. ee 20/02/2007, kuna saabsan Maalgashiga korontada Boosaaso iyo Qardho .*

## **LIFAAQ**

### **Go'aankii G/Wakiillada ee Saldhigyada Korontada Boosaaso & Qardho**

1. In aan la iibin karin saldhigyada korontada Boosaaso & Qardho.
2. In la Ogolaaddo in ay Maal-gashadaan Ganacsatada P/land Saldhigyada Korontada Boosaaso & Qardho.
3. In Dhulka, Dhismayaasha & wixii qiimeley kale ah ee Saldhigyada Korontada Boosaaso & Qardho Dawladdu kaga saami gasho maal-gashiga, iyada oo raacaysa Qawaaniinta maal-gashiga GPL.
4. In Xukuumaddu ku soo dhameystirto muddo lix Bilood ah Xeerka Saamiyada & Qaabdhismeedka Shirkada wadaagga ah ee Saldhigyada Korontada Boosaaso & Qardho, Golahana la kor keenno kalfadhiga Bisha June 2007.
5. Xuquuqda Shaqaalahaa Saldhigyada Korontada Boosaaso & Qardho waxaa Mas'uul ka ah GPL inta laga dhameystirayo maal-gashiga & wixii la xiriira, Dawladda ayaana sii wadaysa gacan ku haynta Saldhigyada korontada Boosaaso & Qardho.
6. Wixii Dhaqaale ah ee laga helo deeq bixiyayaasha oo la geliyo Saldhigyada korontada Boosaaso & Qardho waa hanti Dadweyne waxaana Mas'uul ka ah Dawladda.
7. Wixii Dukuminti ah ee ku saabsan Iibinta & wareejinta Saldhigyada korontada ee Boosaaso & Qardho ee hore u jiray waxaa Buriyey Go'aanka Golaha Wakiillada.

**Wabilaahi Towfiiq**

